

# Macluumaadka Daad-guraynta Bulshada

## Macluumaadka daad-guraynta degdegga ah

### Si aad ammaan u hesho, waxaa fiican inaad hore u baxdo.

#### Waa maxay 'daad-gurayntu'?

Daad-gurayntu macnaheedu waa ka daad-guraynta dadka meel ama xaalad khatar ah. Dadka waxaa loo daad-gureeyaa meel ammaan ah.

Daad-gurayntu waxay dhacdaa haddii ay jirto khatar run ah oo ku haysa ayna ammaan tahay inaad ka baxdo. Haddii aysan ammaan ahayn, hooy kale oo ka duwan kii hore ayey tahay in loo guuro. Markii ay jirto degdeg dhaqso ah digniin daad-gurayn lama bixinayo.

#### Maxaan ugu baahanahay inaan hore u baxo?

Hore u bixiddo waa habka ugu ammaanka badan markii degdeg jiro. Waa inaad ka fiirsataa inaad hore u baxdo inay tahay waxa ugu horreeya inaad samayso markii wax degdeg ah jiraan.

#### Nooc ee degdeg ah oo u baahan doona daad-guraynta?

Waa inaad ku dhaqaaqdaa daad-guraynta markay jiraan degdeg dab, daad, duufaana, taagga soo-rogmada iyo kiimiko. Haddii uu dabka-gubatada ka jiro degaankaaga, ha sugin in lagu waco inaad daad-guraynta samayso. Markuu jiro koodhka Casaanka ah, maalmaha cimilada Daran oo Adag, habka ugu ammaansan waa inaad ka tagto meelaha khatarta badan ka jirto ka-hor intaan dabku ku halis-gelin.

#### Sidee baan ku garanayaa inaan ka-baxo?

U-feejignow digniinaha iyo macluumaadka maalmaha ay jiraan dhacdooyinka cimilada oo daran ama adag. Waxaad macluumaadka oo Ingiriisi ah ka heli kartaa:

- Isteeshinada raadiyaha degaanka ama wararka teleefishinka SKY NEWS Television (ka eeg [www.emv.vic.gov.au](http://www.emv.vic.gov.au) intarneedka oo aad ka helayso liiska dhan ee warbaahiyeyaasha degdegga).
- Dababka gubatada ah – Khadka taleefanka Victorian Bushfire Information Line (VBIL) **1800 240 667** (ama ka eeg [www.cfa.vic.gov.au](http://www.cfa.vic.gov.au) oo the intarneedka ah).
- Daadadka iyo duufaana – Khadka taleefanka VICSES Flood and Storm Information Line **1300 842 737** (ama ka eeg [www.ses.vic.gov.au](http://www.ses.vic.gov.au) oo intarneedka ah).

Haddii aadan Ingiriisiga ku hadlin, waxaad ka wici kartaa **131 450** turjumaan waxaadna ka codsan kartaa Khadka taleefanka Victorian Bushfire Information Line ama Khadka taleefanka VICSES Flood and Storm Information Line, ama ka codso saaxiibka Ingiriisiga ku hadla inuu kaa caawiyo inuu kuu turjumo macluumaadka digniinta oo ku yaal intarneedka.

Waxaad taleefan ama SMS ku heli kartaa **digniinta degdegga**. Cid ka socota bulshadaada ama sarkaalka boliiska ayaa iman kara gurigaaga si ay kuugu sheegaan inaad ka baxdo.

#### Yaa maamulaya daad-guraynta?

Markii degdeg jiro, Boliiska Victoria ayaa ka masuula maamulka daad-guraynta.

#### Maxaan sameeyaa markii lay sheego inaan daad-gureeyo?

Xidh albaabka gurigaaga haddii aad waqti heli karto. Waa inaad raacdaa awaamirta digniinta iyo awaamirta ay bixinayso adeegga degdegga ah.

#### Maxaan qaataa marka baxayo?

Daawooyinka, dharka ilaalinta, biyaha la cabo, dokumantiyada aqoonsiga shaqsiga (tus. Baasaboorka, laysanka baabuur-wadidda iwm), jaarjarka taleefanka mobaylka ah, raadiyaha batariga ku-shaqeeya, dhar dheeraad ah iyo waxyaalaha suuliga lagu isticmaalo.

#### Halkee baan aadaa?

Aad goobta ammaanka ah oo ku qoran digniinta. Waa laga yaabaa inaad hesho jihooyinka sida loo tago halkaas. Isla markii aad soo gaarto goobta ammaanka ah, fadlan is-diiwaangeli, waxay ka caawinaysaa dowladda inay u xaqiijiso dadka adiga kaa walwalaya.

#### Ka waran xayawaanka?

Haddii aad haysato xayawaanka rabaayadda ah ama xawaan kale waxaad helaysaa xidhmada degdegga xayawaanka rabaayadda (ka eeg [www.agriculture.vic.gov.au](http://www.agriculture.vic.gov.au)) wixii macluumaad dheeraad ah. Waxaad u baahan tahay inaad hore u sii qorshaysay xayawaankaaga. Waxaad u baahan tahay inaad hesho hugaano iyo shabaqyo si loogu raro oo loo koontaroolo. Waxaad u baahan tahay inaad hore usii kaxayso xayawaanka beerta daaqa iyo fardaha ama waxaad u baahan tahay inaad daydyada ka tagto ayagoo furan si ay si xor ah ugu dhex socdaan guriga.

#### Ka waran haddaan u baahdo caawimaad si aan u daad-gureeyo?

Waxaad u baahan tahay inaad ka sii fakarto maxaad ugu baahan tahay caawimaadda. Taasi waxay ka mid tahay qorshaynta wixii degdeg ah.

Haddii aadan haysan baabuur waxaad u baahan tahay inaad diyaarsato gaadiid. Tusaale waxaad la guuri kartaa deriskaaga ama qoys ahaan diyaarso inay kaa caawiyaan inaad guurto. **Xusuuso: hore u bixiddo mar kasta waa habka ugu ammaansan.**

#### Goorma ayaan aadi karaa guriga?

Markii ay ammaan tahay inaad ku noqoto gurigaaga, boliiska ama adeegyada degdegga ayaa kuu sheegi doona. Ha aadin guriga ilaa lagu sheego inay ammaan tahay in la aado.

#### Maxaa dhacaya haddii aanan doonayn inaan daad-gureeyo?

Haddii aadan daad-guraynta waxay kugu noqon kartaa khatar adiga iyo qoyskaaga. Waxaa muhiim ah in adiga iyo qoyskaaguba inaad heshaan qorshe ammaan ah aad taqaaniina waxaad samayn kartaan markii wax degdeg ah jiraan.

#### Ammaank shaqsi ahaan

Sii wad inaad dhagaysato oo kala soco raadiyaha ABC iyo warbaahiyeyaasha kale wixii soo cusboonaada.

Si taxadar ah u wad baabuurka. Iskajir qiyaas ka soo baxaya dabka wuu kugu adkaynayaa inaad aragto wadada. Daar nalalka hore ee baabuurkaaga. Iskajir waddooyinku waxaa xiri kara biyaha daadka, geedo soo-jaba ama fiilooyinka korontada oo soo go'a. Haku wadin baabuurka, ama hafuulin, ama haku dhex-socon biyaha daadka. Marna haka qaadin fiilooyinka korontada wadada.

#### JOOGITAANKA BOLIISKA AMA ADEEGYADA DEGDEGGA EE KALE MARKII DAAD-GUREYNTA JIRTO MAR KASTA LAMA DAMAANAD-QAADI KARO.



# Community Evacuation Information

## Emergency evacuation information.

### To be safe, it is best to leave early.

#### What is 'evacuation'?

Evacuation means moving people away from a dangerous area or situation. People are moved to a safe area.

Evacuation happens if there is a real danger to you and it is safe to evacuate. If it is not safe, a different shelter may need to be used. In a fast-moving emergency an evacuation warning may not be given.

#### Why do I need to leave early?

Leaving early is the safest option in an emergency. You should think about leaving early as the first thing to do in an emergency.

#### What kind of emergency will require evacuation?

You need to think about evacuating in a fire, flood, storm, landslide and chemical emergency. If there is a bushfire in your area, do not wait for a call to evacuate. On Code Red, Extreme and Severe weather days, the safest option is to leave high risk areas before fire threatens.

#### How will I know when to evacuate?

Be on alert for warnings and information on days of severe or extreme weather events. You can get information in English from:

- Local radio stations or SKY NEWS Television (visit [www.emv.vic.gov.au](http://www.emv.vic.gov.au) on the internet for a full list of emergency broadcasters).
- For bushfires – Victorian Bushfire Information Line (VBIL) **1800 240 667** (or visit [www.cfa.vic.gov.au](http://www.cfa.vic.gov.au) on the internet).
- For floods and storms – VICSES Flood and Storm Information Line **1300 842 737** (or visit [www.ses.vic.gov.au](http://www.ses.vic.gov.au) on the internet).

If you do not speak English, you can call **131 450** for an interpreter and ask for the Victorian Bushfire Information Line or the VICSES Flood and Storm Information Line, or ask an English speaking friend to help translate the warning information found on the internet.

You may get an **emergency warning** by phone or by SMS. Someone from your community or a police officer may come to your house to tell you to evacuate.

#### Who manages an evacuation?

In an emergency, Victoria Police is responsible for managing an evacuation.

#### What do I do when I am told to evacuate?

Lock the door of your house if you have time. You must follow the instructions on the warning and instructions provided by emergency services.

#### What do I take with me?

Medication, protective clothing, drinking water, personal identity documents (e.g. passport, drivers licence etc.), mobile phone charger, battery powered radio, extra clothes and toiletries.

#### Where do I go?

Go to the safe location written in the warning. You may get directions on how to get there. Once you arrive at the safe location, please register; it will help authorities to reassure people who are worried about you.

#### What about my animals?

If you have pets or animals you can get a pet emergency kit (see [www.delwp.vic.gov.au](http://www.delwp.vic.gov.au)) for more information. You need to plan ahead for your animals. You need to have leads and cages for transportation and control. You need to move farm animals and horses early or you need to leave internal gates open so they can move freely within the property.

#### What if I need help to evacuate?

You need to think about reasons why you may need help. This is part of planning for an emergency.

If you do not have a car you need to organise transport. For example you can leave with your neighbours or arrange for family to help you evacuate. **Remember: Leaving early is always the safest option.**

#### When can I go home?

When it is safe to return to your home, the police or emergency services will tell you. Do not go home until you are told that it is safe to do so.

#### What if I do not want to evacuate?

If you do not evacuate it may be dangerous for you and/or your family. It is important that you and your family have a safety plan and know what to do in an emergency.

#### Personal Safety

Continue to listen to the ABC radio or other emergency broadcasters for updates. Drive carefully. Be aware smoke from a fire will make it difficult to see the road. Turn on your car headlights.

Be aware that roads may be blocked by flood water, fallen trees or power lines. Do not drive, ride, or walk through floodwaters. Never move power lines from the road.

**THE PRESENCE OF POLICE OR OTHER EMERGENCY SERVICES DURING AN EVACUATION CANNOT ALWAYS BE GUARANTEED.**